HIV, xuquuqda, covid-19 iyo HivNorge

Hiv-ka ee Noorway

Hiv-ka Noorway waa ururka kaliya ee bukaan socodka ah ee kajira dalka Norwey dadka qaba/la-nool HIV-ka. sidoo kale waa urur siyaasaded daneynaya qofkasta oo uu saameeyo HIVku, oo ay kujiraan dadka isticmaala PrEP = daawada HIV-ka iyo dadka halista ugu jira caabuqa HIV-ga.

Hivka Noorway shaqadiisa ugu muhiimsan waa in la sugo lana ilaaliyo xuquuqda iyo danaha dadka la nool ama uu saameeyay HIV-ku, oo ay ku jiraan qaraabada, dadka isticmaala PrEP, dadka halista ugu jira caabuqa iyo dadka iyo ururada la kulma kooxahan bartilmaameedka ah shaqadooda.



Waa maxay HIV-ka

HIV-gu waa fayras weerara habka difaaca jirka. Marka uu fayrasku galo jirka, difaacyada ayaa tartiib tartiib u burbura, jidhkuna wuxuu

u nuglaanayaa caabuqyada iyo cudurrada, haddii aadan helin daawo taas joojiso.

Cudurka AIDS-ka (cudurada cilladda difaaca jirka) waa erey wadajir ah oo loogu talagalay tiro cudurro ah oo ay wadaagaan in ay ugu wacan tahay habka difaaca jirka oo is dhimo natiijada cudurka HIV-ka. Waa magac bixin cudur oo isticmaalo daalka Norway. Markaad bilowdo daaweynta HIV-ka, nidaamkaaga difaaca jirka ayaa kordhi doona mana sii buuxin doontid shuruudaha lagu ogaanayo cudurka AIDS-ka.

Ma jiro daawo daaweysa HIV-ka, laakiin daaweynta wax ku oolka ah ee maanta waxay yareyneysaa halista cudurada halista ah waxayna baabi'ineysaa halista in dadka kale la qaadsiiyo.



Wadooyinka cudurka iyo sidii aad iskaga difaaci lahayd

Dadka la nool xanuunka HIV-ka, ee heley daawayn rasmi ah oo ku guulaystay baxnaaninta oo aan lahayn heerarka fayraska ee dhiiga ma qaadsiin karaan dadka kale ee HIV-ka leh. HIV-ka sidoo kale laguma qaado isdhexgalka bulshada, dhunkashada, is hab siinta, isla wadaagga koob, iwm.

HIV-ka waxaa badanaa lagu kala qaadaa galmada aan la iska ilaalin ee lala yeesho qof qaba HIV oo aan baxnaanin daawo ku jirin, dhiig shubis/bixin iyo hooyada ilaa ilmaha wakhtiga uurka, dhalashada iyo naas nuujinta.

Waxaa jira dhowr siyaabood oo aad isaga difaaci karto HIV-ka:

Daaweyn guul leh. Khatar uguma sugnid in aad ka qaado cudurka HIVka qof qaba HIV-ka oo ku guuleystay baxnaaninta daawo. Taas macnaheedu waxa weeye in qofku raacayo daaweynta, qaadanayo daawada sidaas awgeedna heerka fayrasku uu aad u hooseeyo oo aan la isugu gudbin karin, ha ahaado galmo aan la ilaalin, uur ama dhalmo.

Kondhomku wuxuu ka hortagaa HIVka iyo caabuqyada kale ee galmada lagu kala qaado waxaana lagu dalban karaa lacag la'aan barta www.gratiskondomer.no

PrEP (kor-u-qaadista prophylaxis) waa daawooyinka HIV-ka ee la siiyo HIV-taban si looga hortago si la isu qaadsiyo HIV-ka. Si aad u hesho PrEP, waa in dhakhtarkaaga guud uu kuu diraa, xarunta caafimaadka ee Olafia ama waaxda cudurrada faafa ee isbitaalka aad ka tirsan tahay.

Haddii aad la kulantay oo aad ku dhacday xaalad khatar ah oo muhiim ah, PEP (ka-

hortagga cudurka) waxaa loo siin karaa daawo ka hortagi karta fayraska HIV-ku inuu galo unugyada oo uu tarmo. PEP waa in sida ugu dhaqsaha badan loo qaataa ilaa iyo 48 saacadood ka dib marka lala kulmo HIV-ka. PEP waxaa la qaataa 28 maalmood. Dhammaan xarumaha caafimaad ee xaaladaha degdegga ah iyo adeegyada gurmadka deg-degga ee magaalooyinka waaweyn ee Noorway waa inay awoodaan inay maamulaan PEP iyadoon la soo marin wadahadal dhakhtar ee qaybta daawaynta cudurka.

Baadhitaanka hiv-ka

Sida kaliya ee lagu ogaan karo inaad qabtid cudurka HIV waa adigoo iska qaada badhitaan HIV. Waxaad iskaga qaadi kartaa dhakhtarkaaga joogtada ah/GP-yada, ururada qaarkood iyo xarumaha caafimaadka qaarkood ee cilmga galmada sida OlafiaClinic iyo Jinsiga iyo Bulshada (kuwa da`doodu ka yar 25 sano). In lagaa baaro HIV-ka waa bilaash markii aad ka mid tahay dadka kooxda xaalad khatar ah ku jira.

Waxaa jira laba nooc oo baadhitaan ah. Baadhitaan dhiiga ee caadiga ayaa qiyaastii qaadata 1. usbuuc inta aad jawaabta ka helayso. Dhawr urur ayaa sidoo kale bixiya baadhitaan deg deg ah, halkaas oo aad jawaabta ku helayso hal minit gudaheed. Kuwani waa, tusaale ahaan, Guddiga Caafimaadka iyo baadhitaanka Daqiiqadda .

Dadka badankood ee uu ku dhacay HIV-ku, waxa uu baadhitaanku uu soo saarayaa mudo dhan 2-6 toddobaad ka dib marka uu qofku qaado. Dadka in yar oo ka mid ah, waxay qaadan kartaa wakhti yar oo ka dheer, sidaa darteed waxaa lagugula talinayaa inaad is tijaabiso kantaroolka 12 toddobaad kadib markaad ku jirtay xaalad cudurka.

Hadii tijaabdu tahay in lagaa heley

Haddii lagaa helo cudurka HIV-ka, waxaa laguu gudbin doonaa qaybta la socoshada ee xanuunada caabuga oo lagu siin doono fursad baxnaanin. Dhammaan daaweynta la xiriirta HIV-ka ee Norwey waa lacag la’aan.

HIV-ku maanta waa cilad-xanuun oo joogto ah, qofkuna waa la noolaan karaa mudo nolol dheer ah sida qof kasta oo kale. Si taasi u dhacdo, waa muhiim in la bilaabo daaweynta HIV-ka isla markiiba. Tani ma aha oo kaliya qofka dantiisa/qaybtiisa, waxay sidoo kale leedahay faa iidada ah inuu qofku noqdo mid ka aan qaadsiin karin caabuqa ka dib waqti yar oo daaweyn ah. Dabagalku wuxuu ka dhacayaa isbitaal leh qaybta

infakshanka. Mar alla markii ay daaweyntu bilaamato oo aad ogaato inay daawadu shaqayso, waxay sii wadi doontaa kontroolka hal mar ama laba jeer sanadkii. Daaweynta HIV-ku maanta waxay leedahay waxyeellooyin aad u yar oo badiyaa waa hal kaniini maalintii.

Taageero maskaxeed iyo mid bulshoba

HIV-ku waa xanuun loo arki karo in uu yahay cilad adag oo lala noolaado maxaa yeelay waxaa jira nacayb badan iyo aqoon yar oo ku saabsan xanuunka HIV-ka bulshada dhexdeeda. Sidaa darteed, waxay noqon doontaa muhiim inaad haysato qof ku siin kara taageero. Waxay noqon kartaa saaxiibo, qoys, dadka kale ee la nool xanuunka HIV-ka ama tusaale ahaan, waxaad ka qaybgeli kartaa aqoon-isweydaarsiyo ama shirar ka dhaca HivNorge. Dhakhaatiirta iyo kalkaaliyayaasha caafimaadka ee kujira qaybaha cudurka waa taageero wanaagsan, laakiin waxa khibradeena ah inaan la kulanno dadka kale ee la nool HIV-ka waxay ku siinayaan aragti iyo aqoon fiican oo ku saabsan sida nolosha dhabta ah ee HIV-ku ay u muuqato. Adeegga asaasiga ah ee HivNorge waa u fidin dadka la nool HIV-ka ama qaraabada halkaas oo ay kula kulmi karaan oo ay kula wadaagi karaan khibradaha dadka kale ee qaba HIV-ka ama ehelka kale.

Sharciyada

Markaad la nooshahay HIV-ka, waxaa jira xoogaa xuquuq iyo waajibaadyo ah oo aad leedahay. Dhamaan daaweynta cudurka HIV-ka ee Norwey waa lacag la'aan oo aan laga goyn karin, sida uu qabo sharciga xakamaynta caabuqa oo leh xeerar. Marar dhawr ah, waxaad sidoo kale heli kartaa lacag celin kharashyada qaarkood ee dhakhtarka ilkaha ah.

Waajib kuguma aha inaad bixiso warbixin ku saabsan la noolaanshaha cudurka HIV-ka. Waxaanu laakin wali kugula talineynaa inaad u furantahay dhakhtarkaaga. Si dhakhtarku uu u helo sida ugu haboon ee la socoshada xanuunkaaga, iyo sidoo kale inuu hubiyo in daweynta kale ee aad hesho aysan saameyn ku yeelan daawooyinka HIV-ka. waxaa muhiim ah in dhakhtarkagu ogyahay ogaanshaha bukaha cudurka HIV-ka.

Sharciyada xadgudubka ee qaybta 237 ee Xeerka Ciqaabta waxay khusaysaa gudbinta cudurada halista ah ee u dhexeeya dadka. Waxay ka hadlaysaa gudbinta icaabuqyada iyo u bandhigida qof halista caabuqa, laakiin kaliya meesha ay jirto halista dhabta ah ee

cudurka la isugu gudbin karo. In aad-qaadsiisid qof inuu ku dhaco HIV-ku waxay hoos iman kartaa qaybtaan, laakiin waxaa jira waxyaabo badan oo ka reeban.

- Haddii uu qofku helo daweyn baxnaanyn wanaagsan ah, ma leh wax khatar ah oo uu dadka kale ku qaadsiin karo cudurka. Haddii aad sameyso wax kasta oo suurtagal ah si aad uga hortago isqaadsiinta infekshinka galmada, waxaa laga qaadayaa wixii ciqaabta ah. Tan macnaheedu waxa weeye dadka la nool HIV iyo kuwa dawada u joogatada ah qaadanaya ama isticmaalaya cinjirka galmada lama ciqaabi karo.

- Laguguma ciqaabi karo gudbinta infekshin ama u galiso lammaanaha galmada halista infekshinka haddii isagu ama iyadu ay horay u oggolaadeen inay kaala qayb qaataan halista cudurka. Taas macnaheedu maaha inay waajib tahay in la ogeysiiyo, laakiin inaan la ciqaabi karin haddii lammaanaha la wargeliyo oo uu haddana doorto Òinuu naftiisa u galiyo halista infekshinkaÓ. Haddii, dhinaca kale, aadan ku jirin baxnaaninta oo aadan qaadin tallaabooyin kale oo lagama maarmaan ah oo ku filan oo looga hortago infekshinka, waa lagugu ciqaabi karaa haddii aadan la socodsiin lammaanahaaga galmada, infekshanka la is qaadsiinayo iyo in kale.

- Ka reebitaanka ciqaabta ayaa sidoo kale ah infekshan ka yimaada kuwa ka ganacsada jirkooda iyo isduritaanka dadka isticmaala daroogada, iyo sidoo kale gudbinta hooyada iyo ilmaha.

Caymiska

Markaad caymiska qaadanayso, waxaa jira noocyo caymis ah oo kaaga baahan inaad bixiso macluumaad caafimaad. Kuwaas waxaa ka mid ah caymiska nolosha iyo caymiska naafada.

Markii aad gasho caymiska la xiriira caafimaadka, waxaa lagu weydiinayaa inaad buuxiso waraaqo cadaynaya caafimaadka. Warbixinta halkan lagu bixiyay ayaa aasaas u ah qiimeynta caafimaadka shirkadda. Warbixinta waxaa loo isticmaalaa in lagu go'aamiyo qiimaha saxda ah iyo shuruudaha caymiskaaga. Qof kasta oo dalbanaya caymis waxaa ku waajib ah inuu bixiyo warbixinadaas. Haddii ayna warbixintaadu sax ahayn, wax magdhaw ah lama bixin doono haddii caymiska la dajiyay. Warbixinta caafimaadka waxaa looga shaqeeya si sir ah oo adag.

Dadka la nool HIV-ka, si la mid ah kuwa kale, sidoo kale waxay qaadan karaan caymiska nolosha iyo ka naafada. Khatarta waxaa lagu xisaabin doonaa iyada oo ku saleysan

fikirka shaqsiga ah ee kiiska shaqsi ahaan. Tan macnaheedu waxay noqon kartaa in kuwa la halgama dhibaatooyinka caafimaad ee halista ah, in ay halis ugu jiraan in loo diido caymiska. Laakiin kuwa sida dhaqsaha ah ugu heley daaweynta guuleysatay, waa inay ku helaan caymis shuruudo caadiga ah, bedelkeedna leh waxoogaa qiimo sare ah.

Caymisyada kale

Marka laga hadlayo muhiimada HIV-ka ee caymisyada kale, waa kiiska in la oggolyahay oo keliya in la codsado caddeyn caafimaad oo ku saabsan caymisyada oo si toos ah caafimaadka u saameeya. Taasi waa, caymiska halista dhimashada, caymiska halista naafada, caymiska daaweynta, caymiska caafimaadka, caymiska jirrada shaqada iyo caymiska jirada ee halista ah.

Caafimaadka ma khuseeyo marka la qaadanayo waxyaabaha ku saabsan caymiska degaanka/guryaha ama caymiska safarka. Shirkadaha caymiska badankood sidoo kale ma weydiiyaan cadeyn caafimaad wixii ku saabsan ceymiska shilka. Caymiska shilku waa caymis shaqsiyeed, maaha caymiska dhaawaca, wuxuuna ku jiraa isla kooxda caymiska aad ka codsan karto caddaynta caafimaadka. Si kastaba ha noqotee, warbixinta caafimaad kuma khuseeyo caymiska noocaas ah, sidaas darteedna looma oggola in la codsado iyada oo la xiriirta caymiska shilka.

Caymisyada safarka

Marka laga hadlayo caymiska safarka iyo HIV-ka, waa caqli gal in la codsado wixii shaqaynaya. Haddii aad qabtid infekshinka HIV oo sifiican loo baxnaaniyay , lagana helayo la socosho fiican gudaha Norwey oo aad xasilloontahay bixitaankaaga, waxaad heli doontaa caymis ay ugu wacan tahay isbeddel degdeg ah oo lama filaanka ah ee cudurka HIVka.

Xaaladaha macnaheedu waxuu noqon karan in caymiska safarku uusan daboolin daryeelka caafimaad ee la xiriira HIV-ka waxay noqon kartaa haddii isbitaal la dhigo in badan oo sababo ka yimaada HIV-ka ama haddii dhawaanahan aad badashay daawooyinka, haddii ay taasi ku timid hindisooyin ama xaalado caafimaad.

Haddii daawooyinka lagaa xado, caymiska safarku wuxuu, guud ahaan, daboolayaa helitaanka kuwa cusub, laakiin marar dhif ah ayuu daboolayaa dib u soo safrida degdegga ah. Laakiin waa inaad, la tashataa dhakhtar, tixgelisaa inaad dhammaystiri karto safarka daawo la’aan iyo inkale.

Soo bandhiga HivNorges



Haddii aad u baahan tahay talo sharci ama caawimaad si toos ah ula xiriirta ogaanshaha cudurka HIV-ka, HivNorge ayaa kaa caawin kara. Waxaan sidoo kale leenahay adeeg la-talin guud ah haddii aad qabtid su'aalo kale oo la xiriira HIV-ka.

HivNorge malaha baxnaanin wadahadal oo loogu talagalay qof kasta oo qaba HIV-ka ama uu saameeyo HIV-ku, ama isticmaala daawada PrEP. Iyadoo lala kaashanayo lalana shaqaynayo ururka Chemfriendly, waxaan sidoo kale u fidinaa dalab wadahadal ah dadka isticmaala (chemsexbrukere) iyo kuwa kale ee leexsan/gayda ah ee daroogada isticmaala. Haddii aan isla qiimeyno in aan u baahan nahay turjubaan, waan diyaarin doonnaa.

Intaa waxaa dheer, waxaan haynaa waxqabadyo badan oo loogu talagalay dadka la nool HIV-ka ama ay saameysay, kuwa isticmaala daawada PrEP iyo kuwa kale ee daneynaya. Raac jadwalkayaga iyo fursadaha aan bixino iyo waxqabadyadayada.

Haddii aad rabto inaad la hadasho qof kale oo la nool cudurka HIV-ka, waxaan leenahay dad xaaladadaada oo kale ku jira oo badan oo ku faraxsan wada sheekaysiga. Kuweena kale xaaladaas ku sugan waxay kaloo ku hadlaan luqado kala duwan.

HivNorge waxaa laga heli karaa taleefanka nambarkiisu yahay 21314580, ama emayl ama waxaa loo soo marin karaa bayjka.Facebook .

Xagee baad ka heli kartaa taageero

Norway gudaheeda, waxaa ka jira ururo dhowr ah oo adeegyo u fidiya dadka la nool cudurka HIV-ka. Hoos waxaad ka heli doontaa tusaalooyin. Meelahan oo dhan waxaad kula kulmi doontaa xirfadlayaal oo waxaad fursad u heli doontaa inaad kula xiriirto dadka kale ee la nool cudurka HIV-ka.

Oslo: HivNorge og Aksept
Bergen: Leve med hiv, Kirkens bymisjon Bergen
Haugalandet: Leve med hiv Kirkens bymisjon Haugesund
Trondheim: Aksept og mestring, Kirkens bymisjon Trondheim
Kristiansand: Sørlandet sykehus, HIV-poliklinikken
Tromsø: UNN infeksjonsposten og Sosialmedisinsk senter i Tromsø

Intaas waxaa sii dheer, Zanzu.no waa goob ku saabsan warbixineedka, caafimaadka,

caafimaadka galmada iyo HIV-ka, oo ku qoran luqado badan oo kala duwan.

Hiv-ka iyo Covid-19

Markaad la nooshahay HIV-ka, ma jirto halista sii kordheysa ee lagu qaado cudurka coronavirus ama aad ugu xanuunsato cudurka ‘Covid-19’. Haddii aad leedahay habdhis difaaca jirka oo hooseeya (tusaale hadii aad 200 ka hoosayso tirada CD4) iyo cudurro kale oo halista ah, waxaa laga yaabaa inaad ku jirto kuwa halista sare u ah cudurka Koroonaha.

Qeybaha cudurada faafa ee isbitaalada Norwey badanaa waa kuwa lagu daaweeyo xanuunka Koroonaha, sidaas darteedna mararka qaar wax badan ayaa la qaban karaa. Tani waxay saameyn ku yeelan kartaa la socoshada dadka la nool HIV-ka, si markaas qaar ka mid ah dabagalka ay ugu dhici karaan taleefan ama dijitaal, halkii ay ka ahaan lahaayeen la kulan ahaan.

HivNorge waxay soo uruurisay warbixin kusaabsan HIV iyo covid-19 oo dhowr luqadood ku qoran.

Related links

Macluumaad soomaali ah oo ku saabsan koroonada Noorway

På norsk: Hiv, rettigheter, covid-19 og HivNorge

Tallaalka koroonada oo si fudud loo sheegay (Koronavaksine på 123)

Talaalka fayrusta koroonada – Covid-19 Vaccine Moderna

Talaalka fayrusta koroonada – Comirnaty (BioNTech og Pfizer)